Qiyaamaha calaamadihiisa waxaa ka mid ah: in cilmiga la waayo, Jahliguna bato, Sinaduna badato, khamriga cabidiisuna badato, oo Raggu yaraado, Dumarkuna bataan, ilaa kontonkii Dumar ahba hal nin ku soo tooso

Anas Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: waxaan idiin sheegin Xadiis aan ka maqlay Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee Xadiis kaas Qof aan aniga ahayn idiin sheegi maayo: waxaan ka maqlay Rasuulka isagoo dhahaya: Qiyaamaha calaamadihiisa waxaa ka mid ah: in cilmiga la waayo, Jahliguna bato, Sinaduna badato, khamriga cabidiisuna badato, oo Raggu yaraado, Dumarkuna bataan, ilaa kontonkii Dumar ahba hal nin ku soo tooso.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in calaamadaha Qiyaamaha dhawaadkeeda ay ka mida tahay in la qaado Cilmiga Shareecada, waayo Culumadaa dhamaanaysa. Taas waxaa ka imaanaaya in Jahligu faafo siina badato Sinada iyo Faaxishadu, khamri cabiduna badato, tirada Ragguna yaraato, tirada Dumarkuna badato, ilaa kontonkii Dumar ahba uu ku soo aado hal nin, kaasoo danahooda iyo maslaxadooda ka shaqaynaya.

https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65021